



# Heerarka Barashada & imtixaamidda Gobolka

## Waa maxay heerarka barasho?

Heerarka Barashada K-12 ee Gobolka Washington waxay qeexaan waxa ay tahay ardayda oo dhan inay ogaadaan oo ayna awoodaan inay sameeyaan heer fasal oo kasta.

## Maxaynu ugu baahannahay?

Heerarka barasho oo adag waxay ardayga uga baahan yihiin inay uga fikiraan si dhab iyo hal-abuur ah waxa la dhigayo—halkii ay ka xafidi lahaayeen—si ay markaa diyaar ugu noqdaan shaqooyinka, kuuliyadda, iyo nololsha kadib dugsiga sare.

## Qaybahee maaddooyinka ah ayaa leh heerarka barashada?

Heerarka ayaa ka jira 13 qaybood oo ay ku jiraan xisaabta, farshaxanka luqadda Ingiriisiga, sayniska, barashada tiknoolajiyada iyo luqadaha adduunka.

## Maxaynu u leenahay imtixaanada gobolka?

Cabbiraadda horumarka ardayga ee xirfadaha iyo aqoonta muhiimka ah ayaa muhiim u ah qoysaska iyo macalimiinta si ay u ogaadaan haddii ardaydu ku socdaan jihada ay ku qalin jabinayaan iyagoo haysta ikhtiyaarrada, ama haddii ay u baahan karaan caawimo dheeraad ah ama fursado waxbarasho oo hor leh.

Xogta imtixaamidda ayaa sidoo kale ah aalad loogu talagalay dugsiyada, degmooyinka, iyo gobolka si loo caawiyo barayaasha inay hagaajiyaan wax-barista dhammaan ardayda. Imtixaamidda gobolka oo dhan waa muhiim sababtoo ah waxay caawisaa hubinta dhammaan ardayda dugsiyada bulshada, dhibaato malahan halka ay ka aadaan dugsiga, ay ka helaan waxbarasho tayo leh.

## Imtixaanka Gobolka ma loo baahan yahay?

Sharciyada gobolka iyo federaalka waxay u baahan yihiin in ardayda la imtixaamo:

- **Farshaxanka luuqadda Ingiriisida iyo xisaabta:** Fasallada 3 illaa 8 iyo dugsiga sare (ardayda waxay qaataan qiimaynta u Diyaarinta Tayada Kulliyadda (Smarter Balanced assessments)
- **Sayniska:** Fasallada 5, 8, iyo 11

Si aad u ogaato imtixaanada looga baahan yahay qalinjabinta dugsiga sare, fadlan booqo [www.WAtesting.com](http://www.WAtesting.com).

### 5 XAQIIQADA EE UGU SAREEYA

ee ku saabsan heerarka Barashada K-12 iyo Qiimeynta Washington

#### 1 Xirfadaha adduunka dhabta ah

Heerarka barashada Washington iyo qiimeyntu waxay xooga saaraan xirfadaha dhabta ah ee adduunka ee ay ardaydu baranayaan oo ay ku bartaan fasalka maalin kasta sida dhibaato xalinta, fekerka muhiimka ah, iyo qorista. Imtixaanadaas, ardaydu waxay ku muujinayaan shaqadooda, qoraan, kuna sharaxaan jawaabhooda iyagoo qayb ka ah habka qiimeynta, kuwaasoo qiyaasa xirfadaha iyo aqoonta ay u baahan doonaan inay ku sii wadaan waddada ay doortaan.

#### 2 Xiritaanka meelaha banaan

Qiimeynta waxay caawisaa aqoonsiga gaarista meelaha banaan oo u ogolaato dugsiga degmooyinka iyo gobolka in lagu meeleeyo illaha halka inta badan looga baahan yahay.

#### 3 Imtixaamidda waa hal cabir kaliya ah

Imtixaamidda gobolka waa mid ka mid ah dhowr tilmaamayaal, marka lagu daro kaararka wargelinta, jawaabta macalinka iyo shaqada fasalka ee lagu isticmaalay in lagu kordhiyo sawir buuxo ee hormarka ardayga ah ee dugsiga.

#### 4 Waxyaabaha saxda ah

Heerarka barashada gobolka Washington iyo qiimeynta waafaqsan waxaa loo qorsheeyay in ay u diyaariso ardayda kulliyadda, shaqada iyo nololsha.

#### 5 Helitaanka dhammaan ardayda

Imtixaanada Smarter Balanced waxaa loogu talo galay in ay qaabisho ardayda oo dhan, oo ay ku jiraan kuwa naafadda ah iyo ardayda luuqadda Ingiriiska baranaysa.

**BARO  
WAX  
BADAN!**

**Heerarka Barashada**

[bit.ly/StateStandards](http://bit.ly/StateStandards)  
ama iimayl u dir [CoreStandards@k12.wa.us](mailto:CoreStandards@k12.wa.us)

**Imtixaanista Gobolka**

[www.WAtesting.com](http://www.WAtesting.com)  
ama iimayl u diri [StateTesting@k12.wa.us](mailto:StateTesting@k12.wa.us)

**Taageeridda Ardaygaaga**

Dugsiyada Weyn:  
<http://bit.ly/2tRyZoO>